

**2019 SPRING IUPDATE IYO
DIIWAAN-GALINTA BARNAAMIJKA WAXBARASHADA XAGAAGA (S-TERM)**


Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay waalidiinta ka codsanayaan inay soo buuxiyaan macluumaadka goyska ee Spring iUpdate inta u dhexeysa Febraayo 25 ilaa Maajo 31, 2019.

Waaliddiinta/Masuuliyiintu waxay:

- Cusboonaysiin karaan macluumaadkooda xiriirka (sida telefoonka, emailka, iyo cinwaanka guriga) si goysasku mar walba u helaan xiriirka muhiimka ah ee loogu soo dirayo boostada, telefoonka, email-ka ama farriimaha telefoonka.
- Ka diiwaan-galin karaan ardayda fasallada k-8 ee Barnaamijka Waxbarashada Xagaaga. Xilliga kamadambaysta ah ee ahmiyadda diiwaan-galinda waa bisha Abriil 19.
- Muujin karaan inay danaynayaan isboortiga xillaga dayrta ee ardayda dhigata fasallada 9 ilaa 12.

Fadlan soo buuxi Spring iUpdate-ka ugu dambayn Maajo (May) 17 si ilmahaagu u helo **macluumaadka baska iskuulka** maalinta ugu horreysa Barnaamijka Waxbarashada Xagaaga (S-Term).

Waxa aad u baahantahay inaad samayso



Bartan spps.org/onestop ka guda-gal Campus Portal adigoo isticmaalaya qoraalka sirta ah (username iyo password) ee aad ku leedahay One Stop.

- Guji/riix barta Campus Portal & badhanka iUpdate
- Guji/riix badhanka laga galo (login button)
- Gali/qor Furahaaga (One Stop username-ka iyo password-ka). Furaha Username-ku wuxuu ka billowdaa xarafka 'g' oo la raaciyay lix lambar. (gxxxxxx).
- Markaad gasho barta Campus Portal, guji Spring iUpdate ood ka heli karto dhinaca hoose ee bidixda ah.

Haddii ADAAN xasuusan karin Username *iy/ama* Password-kaaga One Stop

- **Internet-ka:** Booqo spps.org/onestop ka dibna guji "Reset Your Password". Fadlan ogow waxaa qasab ah in diwaanka iskuulka ilmahaagu dhigto uu ku jiro teleefankaaga gacanta (mobie) ama email-kaaga.
- **Telefoonka:** Ama, wac xafiiska iskuulkaaga kana codso in dib laguugu saxo username-kaaga iyo password-kaaga.

Macluumaad Dheeraad ah

- Booqo spps.org/onestop
- La xiriir One Stop support ood ka heli karta emailkan onestop@spps.org ama lambarkan 651-744-5145.